



# Qorshaha 122nd Avenue: Ammaanka, Gelitaanka iyo Gaadiidka

Xafiiska Gaadiidka ee Portland (PBOT) wuxuu eegayaa siyaabo lagu hagaajiyo ammaanka, gelitaanka iyo gaadiidka jidka dhererkiisu dhan yahay lixda mayl ee ku fidsan 122nd Avenue inta u dhaxaysa SE Foster Road ee u socda dhanka koonfureed iyo NE Marine Drive ee u socda dhanka waqooyi (ee u dhow Columbia River).

Marinkan maqshuulka ahi wuxuu isku xiraa meelo muhiim ah oo ku yaala bariga Portland kaasi uu u adeega dadka darawaliinta ah, baaskiilka/bushkuleetiga wata, lugeeya isla markaana qaata baska. Si kastaba ha ahaatee, Magaalada waxay jidka 122nd Avenue u aqoonsatay in uu yahay Marin Shilkiisu Badan yahay, taasi oo macnaheedu yahay in tiro badan oo shilalka ahi ay ka dhacaan waddadani taasi oo ku dhacda dhammaan noocyada dadka safraaya.


Waqtigen la joogo, jidka 122nd Avenue waa degaan adag oo ay welwel leedahay in lagu lugeeyo, baaskiil/bushkuleeti lagu wato, waddada laga gudbo isla markaana la aado baska, si ku ku habboona uguma adeego dadka badan ee ku safra. Jidku sida caadiga ah waa waddo shan haad leh oo ay weheliso jid baabuurta la dhigto, iyo jidad baaskiilka/bushkuleetiga a loogu talagalay oo dhuuban. Waddooyinka lagu lugeeyo inta badan waa kuwo dhuuban oo xaaladoodu liidato. Sidoo kale, inta badan jidka 122nd Avenue ma buuxinayo tilmaamaha cusub ee la raacayo ee u yaala Magaalada ee loogu talagalay inta jeer ee in waddooyin lagu lugeeyo laga sameeyo ay tahay marinka oo dhan. Dib u dhac ku yimaada basaska, oo ay ku jiraan wakhtiyo safar oo gaabis ah isla markaana aan la isku hallayn karin.

**Laga soo bilaabo gu'ga ilaa dayrta 2018-ka, PBOT waxay rabtaa in ay idinka maqasho war ku saabsan sida degaanka loo dhigi karo mid ammaan dheeraad ah leh, nafis ah isla markaana ku habboon safarkaaga.**

2015-kii, Magaaladu waxay gashay iskaashi taasi oo ay TriMet bixin doonto Adeeg Joogto ah ee khadka baska 73 isla markaana PBOT ay dhisi doonto ugu yaraan \$8 milyan oo dhanka ammaanka, gelitaanka iyo wanaajinta gaadiidka mudnaanta la siinayo taasi oo hadba sii kordhaysa qiyaastii shan sano. Dhawaan, PBOT waxay dhammeystirtay 4 milyan oo lagu hagaajiyay khadka baska ah 73 iyada oo TriMet ay kor u qaaday joogtanimada basaska. Adeeg bas oo dheeraad ayaa imanaya. Inta lagu jiro barnaamijka PBOT ee *Fixing Our Streets* (FOS), qiyaastii \$2 milyan oo dheeraad ah ayaa la siiyay jidka 122nd Avenue si looga caawiyo aqoonsiga iyo dhisidda wax hagaajinta mudnaanta sare leh ee 2019-2020. Si kastaba ha ahaatee, iyada oo la eegayo dhererka iyo qiyaasta marinka, waxaanu u baahan doonaa maalgelin dheeraad ah mustaqbalka si loo dhammeystiro dhammaan hadafyada loogu talagalay jid wanaagsan, badbaado leh isla markaana la geli karo ee 122nd Avenue.

## Qorshaha Hadaf Ee Dhigta Korka Maraysa 'Overarching'

- Kordhinta ammaanka oo dhan – wanaajinta jidka dadku maraan iyo gelitaanka baaskiilka/bushkuleetiga iyo taageerida gaadiidka wanaagsan iyada oo la isku dheelitirayo baahiyaha loo qaabo gaadiidka iyo noocyada kale ee safar.
- Aqoonsiga hagaajinta si looga caawiyo in 122nd Ave laga saaro nidaamka ay ku jirta ee ah Marin Shilkiisu Badan yahay .



*Magaalada Portland waa mid u hoggaansan dhammaan xeerarka aan takoorka ku dhisnayn, Xuquuqda Madaniga ah, oo ay ku jiraan Xuquuqda Madaniga Title VI iyo ADA Title II. Si aad u codsado turjumaad, ama fasiraad, qorshayaal, wax ka bedel, ama macluumaad dheeraad ah, fadlan PBOT kala xiriir 503-823-5185 ama isticmaal TTY Magaalada 503-823-6868, ama Adeegyada Gudbinta Wararka ee Oregon 'Oregon Relay Service': 711.*

## Nidaamkan qorsheynta, oo ay weheliso talooyinka bulshada, ayaa ka caawin doona kooxda mashruuca:

- In ay dejiyaan dokumenti talo ah oo tilmaamaya wax hagaajinta loogu talagalay dadka lugeynaya, baaskiilka/bushkuleetiga wata, qaadanaya baska isla markaana baabuurta ku wata jidka 122nd Avenue (iyada oo sidoo kale la tixgeliyay qorshe maalgelin fikradeed oo qaabab kala duwan leh).
- In ay aqoonsadaan wixii isbedelo jideed oo ah (qaybta laga gudbo) ee ku yimaada jidadka baabuurka, jidadka baaskiilka/bushkuleetiga, jidka baabuurta la dhigto, waddooyinka lagu lugeeyo iyo isgoysyada.
- In ay aqoonsadaan daryeelka gaadiidka mudnaanta la siinayo ee ka socda Nidaamka Gaadiidka La Xoojiyay si basaska looga dhigo kuwo dhakhso badan oo la isku halayn karo.
- In ay aqoonsadaan mashaariicda mudnaanta sare leh si loogu dhiso lacagta \$2 milyan ah ee barnaamijka 'Fixing Our Streets' ee aan haysano sanadka 2020 (iyo maalgelinta cusub ee mustaqbalka, haddii ay jirto).
- In ay soo jeediyaan mashaariicda mustaqbalka isla markaana raadiyaan siyaabo lagu bixin karo lacagtooda.

## Jadwalka



- **Maajo ilaa Luulyo 2018:** Waanu soo bixi doonaa si aanu ula hadalno adiga iyo bulshada inteeda kale si aan u maqalno fikradaha iyo si loo soo ururiyo talooyin.
- **Luulyo ilaa Ogoosto 2018:** Waxaanu kala shaandheyn doonaa fursadaha wax lagu kala dooranayo isla markaana heli doonaa jawaab celintaada ku saabsan dhowrka hab ee wax loo qabanayo si jidka 122nd Avenue looga dhigo meel ammaan ah in lagu safro.
- **Dayrta 2018:** Waxaanu kuula imaanaynaa qorshe qabyo ah oo loogu talagalay isbedelada ku saabsan jidka 122nd Avenue.
- **2019-2020:** PBOT waxay bilaabi doontaa naqshadeynta iyo dhisidda mashaariicda waqtiga dhow, mashaariicda mudnaanta leh.

## Taladaadu waa muhiim!

Waxaan rabnaa in aan xaqiijino oo aanu maqalno fikrado iyo codad kala duwan, sidaas darteed fadlan noo sheeg waxa aad u maleyneysol!

Waxaan rabnaa in aan war ka maqalno dadka ku nool degaanka, iyo sidoo kale kuwa ka shaqeeya, ka adeegta isla markaana dugsi ka aada halkan. Waxaanu dhammaan faallooyinka, su'aalaha iyo fikradaha dib ugu celin doonaa shaqaalaha ka shaqeeya PBOT iyo TriMet. Waxay ka heli doonaan fikrado caam ah oo aanu ugu dhawaanayno ka dhigida jidka 122nd Avenue in uu noqdo meel ammaan ah u ah dadka lugeynaya, baaskiilka/bushkuleetiga wata, raacaya baska isla markaana baabuurta wata.

Si aad u ogaato waxyaabo dheeraad ah isla markaana ula wadaagno fikrado, nagu soo booqo internet-ka ama nagala soo xiriir:

**Website-ka:** [www.portlandoregon.gov/transportation/122ndAve](http://www.portlandoregon.gov/transportation/122ndAve)

April Bertelsen, Maamulaha Mashruuca PBOT  
 Telefoonka: 503.823.6177  
 Email-ka: [april.bertelsen@portlandoregon.gov](mailto:april.bertelsen@portlandoregon.gov)



Cassie Davis, Xubinta Kooxda Mashruuca  
 Telefoonka: 503.727.3922  
 Email-ka: [cassie.davis@hdrinc.com](mailto:cassie.davis@hdrinc.com)